Diirad-Saaridda Fasalada

SAGAALAAD EE 2021

Tir-tiridda fikaradaha khaldan ee laga aaminsanyahay dugsiga sare • dhisitaanka bulshada • Quwad siinta arday kasta

Sanadka ugu horeeya ee dugsiga sare wuxuu noqon karaa kan oogu adag ardayda inta ay ku jiraan marxalada waxbarasahada. Waxay dareemaan in waxyaabo badan laga filayo iyo isbadal ku yimaada wakhitiyada iskuulka. Waxay sidoo kale dareemaan culays ooga imaanaya waxbarashada iyo la-dhaqanka bulshada cusub oo ay ku soo biireen. Culaysyadani waxay ku keeni karaan ardaydu dhibaato inta ay dugsiga sare dhiganayaan oo dhan. Taas ayaa keentay in dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul uu noqdo mid ***Diiradda Saara Fasalada Sagaalaad (Focus on Freshmen).***

Sanadka ugu horeeya ee dugsiga sare waa wakhti ay in badan oo ardaydu ka mid ah ay sidoo kale bilaabayaan in ay go'aan ka gaaraan qofka ay doonayaan inay noqdaan iyo halka ay doonayaan inay sii aadaan marka ay dugsiga sare ka baxaan. Hadafka barnaamijka ***Diirada Lagu Saarayo Fasalada Sagaalaad*** waa in ardayda la siiyo taageerada ay u baahanyihiin si ay ugu xirnaadaan iskuulka xaafadooda, oo ay fasalada caadi ugu dhigtaan isla markaana ay cagta ku hayaan wadada ay ku qalin jabin lahaayeen.

spps.org/freshmen

Ka-dhigidda Dugsiga Sare Mid Ay Ardayda oo Idil ay Ku Guulaystaan

Oriyanteeshinka Dugsiga Sare
Iskuulkaagu wuxuu bixin doonaa oriyanteeshin loogu talagalay ardayda dugsiga sare bilaabaya ka hor ama isla-maalinta ugu horaysa ee iskuulku bilaabanayo.Oriyentaashinka waxaa loogu talo galay in ardayda dugsiga sare bilaabaysa ka caawiyo u diyaargarowgooda waxbarashada dugsiga sare iyo in ay diirada saaraan macluumaadka, xirfadaha iyo waxyaabaha laga filayo inta ay ku jiraan dugsiga sare. Ardayda waxay taageera helayaan inta uu sanad-dugsiyeedka socdo oo idil.

Waxbarashada Lagu Saleeyay Baahida Ardayga/Personalized Learning
Ardayda dugsiga sare bilaabaysa waxay helayaan casharro lagu jaan gooyay baahidooda waxbarasho iyo qaabka ugu haboon ee ay wax u bartaan. Waxbarshada lagu saleeyay baahida ardayga waxay tixgalinaysaa heerka iyo waxyaabaha la soo darso dhalinta da'da yar waxayna ku dhiiri-galinaysaa in ay si wanaagsan u fikiraan isla markaasna ay u adeegsadaan una soo bandhigaan wixii ay barteen eyaga oo adeegsanayo tiknoolajiyada casriga ah.

Sanneh Foundation Dreamline Program
Inta sanad dugsiyeedka lagu jiro oo dhan, dad ardayda waxbarashada ka caawiya (montors) iyo barayaal kale ayaa la shaqayn doona si ay u abuuraan bay'ad wanaagsan oo ku fadhida xiriir wanaagsan oo ay ardaydu la yeeshaan ardayda waxbarashadoodu liidato.Waxay kaalmo dheeraad ah ku siiyaan, fasalka, sidoo kale waxay caawiyaan saacadaha iskuulka dhamaado kadib, waxaa kale oo ay ku caawiyaan arimaha ciyaaraha ama kobcinta tacliintooda. Haddafka arintaan laga leeyahay waa in lagu wanaajiyo maxsuulka dhibcaha ardaygu (GPA-ga) ku qalin jabin doono, inay ardaydu ka qayb galaan hawlaha saacadaha iskuulku dhamaado kadib la qabto iyo fasalada la dhigto iyo habdhaqanka iskuulka.

Link Crew
Barnaamijka lagu magacaabo Link Crew waa oryanteeshin loo asteeyey in lagu soo dhaweeyo ardayda cusub inta lagu jiro sanad dugsiyeedkooda dugsiga sare ugu horeeya. Laga bilaabo maalinta ugu horaysa ilaa maalinta ugu dambaysa, ardayda dhigato fasallada sagaalaad iyo kan laba iyo tobonaad ayaa u noqda ardayda cusub hogaamiyayaal iyo sidoo kale kuwo wax baro si ay looga dhigo kuwa guulaysta.

Barnaamijka Advancement via Individual Determination (AVID)
Barnaamijka AVID waa kaalmo tacliimeed oo iskuullada laga bixiyo taas oo ardayda u diyaarinaysa galidda iyo ku-guulaysiga kuleejka. Barnaamijka AVID wuxuu taageera gaar ah siiyaa ardayda ka soo jeedo qoomiyadaha aanan cadaanka ahayn, qoysaska miyiga degan, qoysaska dan yarta ah, iyo ardayda kale ee aanay walidkoodu kuleej dhigan. Hadii aad doonaysid in aad banaamijkaan waxyaabo dheeraad ah ah ka ogaatid booqo barta internet-ka ah ee spps.org/avid.

Mac'hadka Parent Academy
Parent Academy waa barmaamij loogu tala-galay waalidiinta inay ku bartaan qaabka ugu haboon oo ay oogu caawin lahaayeen ilmahooda waxbarashada iskuulka, kuleejka iyo Jaamacadda. Seminaarro iyo aqoon-isweydaarsiyo dhoowr ah ayay ku kulmayaan walidiinta, iskuullada iyo bulshada qaybaheeda kala duwan. Fassaladan waxay waalidiintu ku baranayaan sidii ay ardadyda ugu diyaarin lahaayeen kuuleejka, sidoo kale waxay baranayaan qaabkii ay ardaygooda uga caawin lahaayeen in uu ka guul-gaaro waxbarashada, manhajka waxbarasho iyo abuuridda fursado hoggamiyenimo. Waxaa sidoo kale goobta joogaa kooxo ku bixiya barmaamijka luuqadaha aanan ingriis ahayn. Hadii aad u baahan tahay maclumaad dheeri ah, wac xafiiska Family Engagement 651-767-8347.

Barnaamijka Partnerships
Iskaashiyada ay Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul leeyihiin ayaa abuuray taageero salballaadhan oo ay siiyaan ardaydeena dugsiga sare soo galaya. Taageeradaas waxaa ka mid ah mid lagaga hortagayo maqnaanshaha ama soo daahitaanka, waxaa sidoo kale kaalmadaas qayb ka qaadanaya koox luuqado badan oo kala duwan ku hadla iyo sidoo kale guddiga waalidiinta ee parent advisory councils (PACs) oo qoysaska kala qayb-qaadanaya waxbarashada ilmahooda. Hay'adda Generation Next, waxay nala samaysaa iskaashi muhiim ah oo dhinaca ardayda ah laga billaabo waxbarashada caruurnimada hore ilaa iyo kulliyad. Barnaamijka hay'adani wuxuu u fidiyaa ardayda kaalmo farsamo iyo mid dhaqaale iyagoo usoo marinaya barnaamijkooda On-Track initiative.

Si aad haddaba waxyaaba dheeraad ah uga ogaato qaabka aad ilmahaada ugu diyaarin lahayd kuleejka waxaad la xiriirtaa la-taliyaha iskuulka ee ilmahaada ama booqataa bogga interneedka ee spps.org/occr.